

# Tilmaanta Waydiinta Codsadaha Guri

- Waa sharci-darro Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Maine in la sameeyo ama la sababo in la sameeyo **waydiin qoraal ama hadal** kasta khusaysa farac, midab, sinji, xidhiidh galmo, naafo maskax ama muuq, diin, duriyad, qolo, firka qoys ee iibsade kasta, daganaade ama kirayste ee hoyga guri.
- Sidoo kale waa sharci-darro qof kasta dagaya dhismayaal kiro ama hoyga dadwayne in loo diido in laga kirayo ama in lagu khasbo sharciyo kale oo kiro qof kasta kaasoo ah helaha kaalmada fadaraalka, gobal, ama kaalmada heer deegaan, ooy ka mid tahay kaalmada caafimaad iyo caawinta guri, marka hore sababtoo ah shakhsiyadka loo aqoonsanyahay helayaasha caawin.
- Waydiimuhu ma ahan sharci-darro haddii ay la xidhiidhaan arrimo ganacsi ooyna ku salaysnayn qaybah la ilaaliyay.
- Guryaha badankood ee dadka da'da ah, sida sharcigu sheegayo, waa laga dhaafay sharciga mabnuuca takoorka firka qoys (laga reebo xayisiinta) waxayna wax ka waydiin karaan firka qoys ee cogsadaha. Fadlan la soo xidhiidh Golaha haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan aqoonsigaaga ah siiyaha guri dadka da'da.
- Goluhu wuxuu ku taliyaa in xulashada kiraystayaal, guri bixiyayaasha ay diiradda saaraan si gaar ah shuruudaha sharci ee cogsadaha ee guri la siiyay.
- Waydiimaha guri ee lagu sameeyay tilmaamaha raacidda, ama shuruudaha ah, wakaalad ama wakaalado deegaan, gobal, ama dawladda dhexe ee xidhiidhka la leh maamulidda barnaamijyada guri caawinta kuma ahan sharci-darro Hay'adda Dawada & Caafimaadka (MHRA).
- Hay'adda Dawada & Caafimaadka (MHRA) ma mabnuucdo waydiinta cogsadaha in la siiyo xog ka caawinaysa raacidda qorshe sharci ah.
- Liiska su'aalaha "sharciga ah" iyo "kuwa sharci-darrada ah" ee ka kooban halkaan kuma dhama. Waxaa loola jeedaa in lagu muujiyo noocyoo su'aalo ah oo badanaa soo noqnoqda.

QAYBAHA	TUSAALOOYIN WAYDIIMO SHARCI	WAYDIIMO SHARCI DARRO AH
DURIYAD/QOLO	<ul style="list-style-type: none"> <li>Haddii uu cogsaduhu yahay muwaadin U.S.</li> <li>Haddii uu cogsaduhu si sharci ah u qalmo inuu si rasmi ah u joogo U.S.</li> <li>Ciwaanka hadda ee cogsadaha.</li> <li>Inta uu cogsaduhu ku noolaa Gobalkan ama bulsho deegaan dhexdeeda.</li> <li>Goobihii hore ee dagnaansho marka ay muhiim tahay in la hubiyo aqoonsiyada.</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Jinsiyad, nasabad, duriyad, asalka, ama goobta dhalasho ee cogsade ama qaraabo.</li> <li>Dhalashada cogsade ama luuqadiisa koobaad.</li> <li>Sida cogsaduhu awood ugu leeyahay akhrin, qorid, ama ku hadlid luuqad ajanabi.</li> <li>Magac awoowe ama magac hore (in ay muhiim tahay in la hubiyo aqoonsi mooyaane).</li> <li>Sawir la socda codsi.</li> <li>Inta uu ku noolaa U.S.</li> </ul>
DIINTA		<ul style="list-style-type: none"> <li>Madhabta diineed, xidhiidhka, goobta cibaado, culimada diinta, ama ciidaha diimaha la xuso.</li> <li>Magaca wadaadka diinta aqoonsi ahaan.</li> </ul>
FIR	<ul style="list-style-type: none"> <li>Cadaymaha danbiile oo xidhiidh la leh karidda in loo hogaansamo heshiiska kiro.</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Firka cogsadaha ama qaraabada.</li> <li>Diirkka ama midabka jidhka ama indhaha.</li> <li>Sawir la socda codsi.</li> <li>Diiwaanka xabsi galid</li> </ul>

<b>SINJI/UURKA</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Magacyada dadka ku jira qoyska.</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Haddii uu codsaduhu leeyahay uur, leeyahay caruur, ama uu qorshaynayo inuu yeesho caruur.</li> <li>Xaaladda guur.</li> <li>Magaca awoowe.</li> <li>Su'aalaha la waydiyo kali ah hal sinji laakiin kuwa kale aan la waydiin, sida, waydiinta kali ah dumarka ku saabsan karidda inay jaraan caws ama xaadhaan baraf.</li> <li>Sinjiyadda dadka ku jira qoyska.</li> </ul>
<b>FIRKA QOYS</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Tirada dadka ku jira qoyska.</li> <li>Taariikhaha dhalasho marka ay muhiim tahay in la fuliyo hubinta taariikh si loo yaqiinsado karidda loogu hogansamayo heshiiska kiro.</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Tirada caruurta ku jirta qoyska.</li> <li>Da'da dadka ku jira qoyska (arrinta la xidhiidha "guri siinta da'dka da'da ah mooyee").</li> <li>Uurka, ilmo dhalidda mustaqbalka, xanaanaynta, ama qorshayaasha korsashada.</li> </ul>
<b>XIDHIIDH GALMO</b>		<ul style="list-style-type: none"> <li>Xidhiidhka galmo, Xidhiidhka jinsi, ama baaqa jinsi ee codsade.</li> <li>Xidhiidhka u dhxeeyea xubnaha qoys.</li> <li>Xaaladda guur.</li> <li>Magaca xaas/nin ama ka duwanaanshaha qof kale.</li> <li>Sawir la socda codsi.</li> </ul>
<b>NAAFANIMO</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Hddii uu qofku awoodo inuu waafaqo shuruudaha heshiiska kiro ama ogolaanshaha kiro, haddii la siiyo hoy ku haboon naafada, la siiyay su'aashan waa waydiinta dhamaan codsadayaasha.</li> <li>Haddii qofku codsado hoy wanaagsan ama badalid, qofka waxaa la waydiin karaa cadaynta naafanimo iyo baahida hoyga ama badalidda.</li> <li>Haddii uu qofku haysto xayawaan.</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Haddii uu qofku leeyahay wax xaalad caafimaad ah, in lagu xaqijinayo u qalmidda barnaamijka guri siinta mooyaane ee dadka naafada ah.</li> <li>Haddii uu qofku leeyahy ama lahaa dhibaato la qabsi khamro ama daroogo.</li> <li>Haddii uu qofku u baahdo hoy wanaagsan ama badalitaan si loo helo qanacsanaan isku mid ah guryaha, marka hore inuu codsado codsaduhu mooyaane.</li> <li>Haddii uu qofku haysto adeeg, caafimaad, ama caawin xayawaan, marka hore inuu cadeeyo codsaduhu mooyaane.</li> </ul>
<b>WAX KALE</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Sigaar cabid (ama sigaar cabid la'aan).</li> </ul>	
<b>HELIDDA KAALMADA (Sida Qaybta 8, TANF, iyo Kaalmada Guud)</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Golaha Xuquuqda Aadamaha ee Maine waxay ku taliyaan in mulkiilayaasha iyo maareeyayaasha ka hortagaan samaynta waydiimaha hadalka ama qoraalka ah ee qofka aaminsiin kara in loo diiday guri sababtoo ah aqoonsigooda ah helidda kaalmada.</li> <li>Ma ahan sharci darro in la waydiyo codsade sida ay ama uu qorshaynayo inuu u bixiyo kiro</li> </ul>	